



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

1250 West Broadway Ave.
Minneapolis, Minnesota 55404

Ed Graff
Superintendent

September 5, 2017

Dugsiyada dadweynaha Minneapolis (MPS), waxay la mid yihiin ururrada kale ee ka jira gobolka sida iyo ganacsata minnesota iyo kuwo kale ee ka jira wadanka oo dhan, inagoo wanaajineyna in ay ardayda iyo shaqaalaha muhaajiriinta ay ka shqeystaan ayna waxna ku bartaan dugsiyadeena.

Dad badan oo muhaajiriinta ah oo loo yaqaano “Dreamers,” waxay imaadeen wadankaan iyaga oo caruur ah waxayna ka faa’iideysteen waxqabadka Dib-u-dhigida caruurnimada soogalootiga (DACA) kaas oo ahaa amarkii la saxiixay sanadkii 2012. DACA waxaa uu difaacayey dhalinyarada aan sharciga haysan ee ka soo jeeda muhaajiriinta kuwaas oo loo ogolaaday inay helaan ruqsadaha sharciga darawalnimada inay helaan, iskana diiwaan-galin karaan kooleeyada heli karaana shaqooyinka sharciga saxda ah oo amaanka leh..

Waxaan si aad ah uga wal-walsanahay lana duubanahay hogaamiyeyaasha dugsiyo badan oo ku yaala wadanka dacaladiisa, inay ka hadlaan kana soo horjeestaan hadaladii ka soo yeeray maantay aqalka cad “White House” ee ku socday barnaamijka DACA inay la joojinayo. —hada ama lixda bilood ee soo socota . Waxaan ku biiraynaa hogaamiyeyaasha waydiisanaya gollaha baarlamaanka inay si deg-deg ah u ansaxiyaan sharci ilaalinaya barnaajimka DACA, sharuudaha caqabadahaan soo wajahay ardaydeena intooda badan iyo goysaskooda.

Maantay waxaan ogahay in shaqaale badan oo ka tirsan dugsiyada dadweynaha Minneapolis, ardayda iyo goysaskooda ay soo wajahdo cabsi, shaki, caro iyo niyad jab. Fadlan ogaada in aan wali haystaan taageerada dugsiyada dadweynaha Minneapolis maadaama ay saameyn ku yeelan karto ogaysiiskii maantay. Fadlan ogsoonow in aad imaan karto shaqadaada ama iskuulkaaga maalinta bari ah adigoo helaaya taageerada buuxda iyo adeegyo waxbarasho oo aad aad horay ugu haysatay halkaan inta aan lasoo jeedin digniinahaan. Waxaan sii wadaynaa imaan aaminno eraydii Guddiga golaha Waxbarashada, kuwaas oo bishii janaayo sheegay in doorka dugsiyada damada ay san ahayn in la weydiyo xaalada muhaajinimada ardayga ama goyskooda xaaladooda socdaalka. Doorkeena waa inaan wax barno ardayda waxaan sameyn karnaa oo kaliya in ay ardaydeena iyo shaqaalaheenaba dareemaan in ay ammaan yihiin.

Waxaan ku boorinaynaa in ardayda dugsiyada dadweynaha Minneapolis iyo shaqaalaha ay saameeyeen ku dhawaaqista ogoow xaquuqdaada. Meelo badan ayaa bixinaya macluumaadkii ugu danbeeyey:

- Dugsiyada dadweynaha Minneapolis Waaxda Luuqada Ingriiska iyo Waxbarashada caalamiga waxay bixinayaan warbixinadaan soo socda: http://multilingual.mpls.k12.mn.us/resources_for_immigrants
- Xarunta Sharciga muhaajiriinta ee MN waxay bixiyaan adeegyada [Immigrant and Refugee Rights Helpline](#) si ay ugu xiraan xubnaha bulshada iyaga oo helaya latashiyada lacag la’aanta ah. Khadka caawinta waxaa uu u diyaarinayaa muhaajiriinta iyo qaxootiga ku nool MN kuwaas oo uu daqligoodu ka hooseeyo 250% heerka farqiga federaalka. Qoraalo badan oo warbixinadaan ah waxaad ku helaysaa Ingariis, Isbaanish, iyo [Soomaali](#) (PDF).
- [Mid-Minnesota Legal Aid](#) waxay bixisaa kaalmo sharciyeed oo bilaash ah oo loogu talo galay xubnaha bulshada dakhligoodu yar yahay kaas oo ka caawinaya qeybo badan oo sharciga, oo ay ku jiraan soogalootinimada
- [Tusaha Adeegyada sharciyada qaxootiga Minnesota](#) iyo [Immigration Advocates Network](#)